# Daraasad cilmiyeed oo ku saabsan nalokson oo sanka lagu buufiyo

**Magaca daraasadda**: NTNU Intranasal Naloxone Trial (NINA-1)
**Lambarka diiwaanka**: EudraCT 2016-004072-22

## Yaa ka masuul ah?

Jaamacadda sancada iuyo sayniska ee Noorway (NTNU), Machadka wareegga iyo sawir ku baadhista (ISB) oo metelayo borofesoor Ola Dale.

Adeegga gargaarka caafimaadka ee degdegga ah ee Oslo iyo Akershus iyo Adeegga gargaarka caafimaadka ee degdegga ah ee Trondheim ayaa ah goobaha laga wado daraasadda.

Daraasadda waxa oggolaaday Guddi-goboleedka Anshaxa iyo Hay'dda Dawooyinka ee Noorway. Daraasaddu waxay la shaqaynaysaa labo ka mid ah shirkadaha dawooyinka ee ku yaala Noorway , oo kala ah Sanivo Pharma iyo DnE Farma.

## Daraasaddu maxay ku saabsan tahay?

Naloksoon, dawo ku lid ah madooyinka morfiinta, sida caadiga aha waxa lagu qaataa irbad.

Waxannu daraasad ku samaynaynaa naloksoonta sanka lagu buufiyo oo cusub, oo aanu aaminsannahay inay ka fududahay kana fiicantahay ta maanta jirta, isla markaana waxannu rabnaa in si uuxda loo ogolaado inay dawo tahay. Taasoo macnaheedu yahay in faa'idadeeda iyo cilladaheeda si fiican loo ogaan doono.

Waxannu buufinta sanka ku tijaabinay dad is-xilqaamay oo jooga Trondheim muddadii 2013 ilaa 2016, imikana waxannu buufinta ku tijaabinaynaa dad si dhab ah u qaatay maado xad-dhaaf ah oo jooga Oslo iyo Trondheim.

## Maxaannu kugu samaynay?

Waxa aad ka mid noqotay daraasad lagu siiyey dawo ku jirta irbad ama naloksoon sanka lagu buufiyo oo cusub. Daaweyntii caadiga ahayd ee ahayd ka caawinta hawo-qaadashada waxba ma laga beddelin.

Marka shaqaalaha gargaarka caafimaadku helaan bukaan looga shakiyey inuu qaatay maado xad-dhaaf ah, waxa ugu horeeya ee ay sameeyaan waxa weeye inay bukaanka ka caawiyaan inuu ku neefsado maasko iyo bacda neefta. Daraasadani waxba kama beddelin intaas.

Sida caadiga waxa bukaanka dawada laga siiyaa xididka dhiigga ama muruqa garabka. Laakiin daraasadan, waxa baabuurka gargaarku wataa dawooyin ku jira qasnad oo ka kooban irbado iyo buufin san, labadana waa la siinayaa bukaanka. Mid waxay ka koobantahay dawo shaqaynaysaa (naloksoon) halka ta kalena tahay biyo aan lahayn wax dawo ah. Si kastaba bukaanka oo dhan markasta waa la siinayaa dawo noocay noqotaba.

Irbada waxa ku jira Naloksoon 0,4 mg/ml. Waxa la qaadanayaa 2 ml oo muruqa laga qaato= 0,8 mg oo ah nalooksoon oo la siinayo ka qaybgalayaasha. Dawada ku jirta irbadu waxa ay caadi ahaan la mid tahay inta baabuurta gargaarku ay bixiyaan.



amesto
Amesto Translations AS
Org.nr. NO 956 153 557

Buufinta sanka waxa xoogeedu yahay 14 mg/ml naloksoon islamarkaana halka mare e ah 0,1 ml= hal mar oo ah 1,4 mg naloksoon oo la siinayo ka qaybgalayaasha. Waxannu filaynaa in nus iyo dheeraad ka mid ah dawado gelayso dhiigaaga.

Lama garan karo in lagu siinayo naloksoon ku jirta buufinta sanka ama irbad, oo xataa shaqaalaha gargaarka ama kuwa baadhaya xogta ayaan kala ogeyn waxa la isticmaalay ilaa iyo inta ay daraasadu dhamaanayso. Taa macnaheedu waxa weeye in daraasadu tahay mid dhinacna wax ogeyn isla markaana nasiib ah. Waa sida ugu fiicaan ee lagu ogaan karo sida ay dawadu u shaqaynayso.

## Amaan ma tahay?

Amaanka ka qaybgalayaasha ayaa ah waxa ugu muhiimsan marka la samaynayo daraasadan. Qaadashada daroogo xad-dhaaf ah waa xaalad halis ah nafta halis u ah, waxaana lagama maarmaan ah gargaarka koowaad ee caafimaadka ah iyo daaweyn caafimaad oo degdeg ah.

In qofku isku badiyey obiyoodka (opiod) waxa lagu gartaa dhibaato ka qabsata neefsashada. Waxba ma laga beddelin caawimada shaqaalaha gargaarka degdegga ah ee ah banaynta marinnada hawada iyo ka caawinta neefsashada.

Kadib marka qofka la siiyo dawo waxa loola soconayaa si wacan waxaana la siinayaa caawimo neefsasho muddo ah 10 daqiiqo haddii uuu baahdo. Haddii qofku ku toosi waayo 10 daqiiqo waxa la joojinayaa daaweyntii daraasadda. Markaa waxa qofka la siinayaa naloksoon dheeraad ah oo nooceedu yahay nooca shaqaalaha gargaarka degdegga ah isticmaalaan, waxaana la eegi doonaa in loo baahanyahay gaargaar caafimaad oo nooc kale ah.

Haddii xaaladu sii xumaato ka hor intaan aanay toban daqiiqo socon, waxa la joojinayaa daraasadda, kadibna shaqaalaha caafimaadka ayaa samaynaya hawlaha caafimaad ee u wacan bukaanka.

## Waa maxay shuruudaha ka qaybgalku?

- In laga shakiyey qaadashada obiyood xad-dhaaf ah, taasoo ka in:
    - Neefsashadu yaraatay
    - Birta indhaha oo yaraada
    - Miyirka oo hoos u dhacay
- Iyo garaaca wadnaha oo laga dareemayo cunaha

## Maxaa keeni kara in qofka laga reebo daraasadda?

Haddii qofku qabo hal ama dhowr ka mid ah arrimahan, waxa laga reebayaa daraasadda:

- Wadne istaag
- Marka shaqaalaha gargaarku kuu neefsan kari waayaan
- In dhaawac kaaga yaalo wejiga ama sanka ka dhiigaysid
- Marka shaqaalaha gargaarku sabab u yihiin qaadashada daroogo xad-dhaaf ah
- Marka shaqaalaha gargaarku ogyihiin ama u malaynayaan inaad ka yartahay 18 sanno
- Marka shaqaalaha gargaarku ogyihiin ama ka shakiyaan inaad uur leedahay
- Naloksoon ayaa lagu siiyey ka hor intaan shaqaalaha gargaarku kuu iman



amesto
Amesto Translations AS
Org.nr. NO 956 153 557

- Marka qofka qaatay daroogada xad-dhaafka uu ku jiro xabsi
- Marka shaqaalaha gargaarku kama mid ahayn shaqaalaha daraasadda
- Marka aan lahayn dawo
- Marka dawada daraasadda la barafeeyey ama wakhtigeedu dhammaaday
- Marka meesha aad ku qaadatay daroogada xad-dhaafka ay tahay meel aan ku haboonayn cilmi-baadhis ama ay jiraan sababo kale oo shaqaalaha gargaarka ka hortaagan inay kugu daraan daraasadda
- Haddii aanad oggolaan inaad in la isticmaalo macluumaadkaaga.

## Macluumaad noocee ah ayaa la diiwaangeliyey?

- Magaca iyo lambarka dhalashada
- Wakhtiga iyo goobta daaweynta iyo hawlgalka shaqaalaha gargaarka
- Faa'idada daaweynta- qaabka aad u neefsanaysay intaan lagu siin dawada, ogsijiinka ku jiray dhiigaaga iyo wakhtiga ay kugu qaadatay inaad caadi u neefsatid,miyirkaaguna ku soo noqday caadi.
- Sida ay xaaladaadu tahay daaweynta kadib
- Ma waxa lagu geeyey cisbitaalka degdegga ah, cisbitaalka caadiga ah mise waxa lagaaga tegay meeshii aad ku qaadatay daroogada xad-dhaafka ah
- In shaqaalaha gargaarku markale kaa daweeyeen daroogo xad-dhaaf ah, 24-kii saacadood ee ka dambeeyey daaweyntii daraasadda
- Annagu ma diiwaangelin doono xidhiidhka kale ee la yeelatid shaqaalaha gargaarka, cisbitaalka ama dhakhtarka joogtada ah
- Haddii lagu jiifiyo cisbitaalka kadib marka daroogadii xad-dhaafka ahayd lagaaga daweeyey buufinta sanka oo ay kugu keentay cillad, annaga iyo cisbitaalku waanu la socon doonaa xaaladda, isla markaana waxannu diiwaangelin doonaa cilladda.

## Yaa arki kara inaad qaatay daroogo xad-dhaaf ah?

- Macluumaadka ku saabsan adiga iyo daaweynta waa la summad tirayaa waxaana lagu kaydinayaa meel amaan ah. Taasoo macnaheedu yahay in magacaaga iyo lambarkaaga dhalashada lagu kaydinayo meel kale. Kooxda daraasadda oo keliya ayaa arki karta. Maclumaadka oo dhan waxa loo ilaalinayaa si la mid ah xogta caafimaadka ee ay hayaan gargaarka degdegga ah.
- Wax kasta waxa la tirtirayaa 15 sanno kadib marka daraasaddu dhamaato.
- Xogta ma lala wadaagayo cid kale ama looma isticmaalayo wax ka duwan daraasadan.
- Suurtagal maaha in adiga lagaa dhex garto natiijada daraasadda ee la soo saarayo.
- Xogta waxa la tusi karaa Hay'adda Dawooyinka si loo kantaroolo daraasadda.
- Xogta la summad tiray (si aan cidna adiga kuu garan) waxa lala wadaagi karaa cilmi-baadheyaal ama soo-saarayaasha raba inay hubsadaan daraasadda.

## Xuquuq noocee ah ayaan leeyahay?

- Xaq ayaad u leedahay inaad ka baxdid daraasadda.
- Inkastoo aad shaqaalaha gargaarka u sheegtay inaad ogoshahay ka qaybgalka, haddana mar dambe waad ka laaban kartaa.
- Waad nala soo xidhiidhi kartaa si aad u ogaatid macluumaadka kaa diiwaangashan.
- Wax faa'ido ah ma kuugu jirto inaad ka qaybgashid daraasadan.
- Waxa aad qayb ka noqonaysaa sidii mustaqbalka loo heli lahaa daaweynta fudud oo



amesto®
Amesto Translations AS
Org.nr. NO 956 153 557

fiican oo lagu daweeyo daroogada xad-dhaafka ah.
- Waxa aad caymis ka gelaysaa Caymiska Masuuliyadda Dawooyinka (Legemiddelansvarsforsikringen)

## Naloksoon ma leedahay wax cillad ah?

Naloksoon waa dawo la yaqaano oo loo arko mid dhibaato lahayn. Wadamo badan waxa la iibiyaa warqad la'aan. Waxannu diiwaangelinnaa cillado ay ka mid yihiin lalabo, matag iyo madax-xanuun. Haddii cilladuhu noqdaan kuwo daran, waxa lagu jiifinayaa cisbitaal.

## Daraasadda waad ku jirtaa, laakiin waa la tirtiri karaa macluumaadkaaga

Haddii ay jidhkaaga gashay daroogo xad-dhaaf ah oo lagugu daray daraasaddan, waxa aad dooran kartaa in aannu isticmaali karno macluumaadka aannu ka helnay tijaabada, iyo in kale. Dadka qaar ayaan  awoodin inay go'aan ka gaadhaan arrintaas isla marka ay daroogadii xad-dhaafka ahayd ka baxday jidhkooda, laakiin qofkii awooda, waxa shaqaalaha gargaarku weydiin doonnaan inuu u oggolaado in macluumaadka lagu isticmaalo daraasadda. Haddii aad diidid in aannu macluumaadka laga helay daaweyntaadii u isticmaalno daraasadda, waa la tirtirayaa macluumaadkaaga. Inkastoo aad goobtaas ku oggolaatid, hadana mar dambe waa ka laaban kartaa oggolaanshaha.

## Maxaa dhacaya haddii aan oggolaan karin?

Haddii aanad awoodin inaad oggolaansho bixisid kadib markii ay ku gashay daroogo xad-dhaaf ah, waxa lagugu darayaa daraasadda. Haddii aad hadda oggoshahay inaad ku jirtid daraasadda, ma u baahnid inaad wax kale samaysid.

Haddii aad garatid inaad ka baxdid daraasadda waa inaad kooxda daraasadda u soo dirtid telefoon ama boggan internetka ku sheegtid inaad ka baxaysid.

## Waxaan rabaa inaan ka baxo daraasadda

Buuxi foomka ku yaala korka xaashidan, ku qor macluumaadka oo dhan ilaa inta aad ka xasuusantahay. Lambarka aad daraasadda ku leedahay waxa uu ku qoranyahay warqadda aad ka heshay shaqaalaha gargaarka. Ama soo wac 23026150 isniin ilaa jimce saacadaha 08.30 ilaa 16.00.



amesto
Amesto Translations AS
Org.nr. NO 956 153 557

# Waxaad ku gashay daroogo xad-dhaaf ah, taas darteed waxa lagugu daray daraasad cilmiyeed

Waxannu is barbardhigaynaa naloksoon (dawada herowiinta) oo lagu buufiyo sanka ama lagu qaato irbad.

Ujeedadu waxa weeye in la sameeyo buufin san la tayo ah mudniinka irbada ee maanta la isticmaalo.

Lambarkaaga daraasadu waa

Cilmi-baadhayaasha oo keliya ayaa ogaan kara qofka aad tahay

Marka aad rabtid ayaad ka bixi kartaa daraasadda, macluumaad kalena waxaad ka heli kartaa

www.nalokson.no

Buuxi foomka ku jira www.nalokson.no si loo tirtiro



amesto
Amesto Translations AS
Org.nr. NO 956 153 557

macluumaadka kugu saabsan adiga.
Ama waxa aad soo wici kartaa 23026150

Vennlig hilsen Ambulansetjenesten og NTNU

NTNU

ST. OLAVS HOSPITAL
UNIVERSITETSSYKEHUSET I TRONDHEIM

Oslo universitetssykehus



amesto
Amesto Translations AS
Org.nr. NO 956 153 557

**Yaa ka masuul ah?** NTNU, Machadka wareegga iyo sawir ku baadhista (ISB) oo metelayo borofesoor Ola Dale.

**Daraasaddu maxay ku saabsan tahay?**
Waxannu daraasad ku samaynaynaa naloksoonta sanka lagu buufiyo oo cusub, oo aanu aaminsannahay inay ka fududahay kana fiicantahay ta maanta jirta, isla markaana waxannu rabnaa in si uuxda loo ogolaado inay dawo tahay. Taasoo macnaheedu yahay in faa'idadeeda iyo cilladaheeda si fiican loo ogaan doono.kjent.

**Maxaanu kugu samaynay?**
Waxa aad ka mid noqotay daraasad lagu siiyey dawo ku jirta irbad ama naloksoon sanka lagu buufiyo oo cusub. Daaweyntii caadiga ahayd ee ahayd ka caawinta hawo-qaadashada waxba ma laga beddelin.
Laakiin daraasadan, waxa baabuurka gargaarku wataa dawooyin ku jira qasnad oo ka kooban irbado iyo buufin san, labadana waa lagu siinayaa. Mid waxay ka koobantahay dawo shaqaynaysaa (naloksoon) halka ta kalena tahay biyo aan lahayn wax dawo ah. Irbada waxa ku jira Naloksoon 0,4 mg/ml. Waxa la qaadanayaa 2 ml oo muruqa laga qaato= 0,8 mg oo ah nalooksoon. Dawada ku jirta irbadu waxa ay caadi ahaan la mid tahay inta baabuurta gargaarku ay bixiyaan.Buufinta sanka waxa xoogeedu yahay 14 mg/ml naloksoon islamarkaana halka mare e ah 0,1 ml= hal mar oo ah 1,4 mg naloksoon. Waxannu filaynaa in nus iyo dheeraad ka mid ah dawadu ay gelayso dhiigaaga. Lama garanayo in lagu siinayo buufin ama irbad, laakiin si kastaba bukaanka oo dhan markasta waa la siinayaa dawo noocay noqotaba.

**Amaan ma tahay?**
Haa, waxannu aaminsannahay in daraasaddu amaantahay. Daaweynta daraasaddu wax weyn am ka gedisna daaweynta caadiga ah, oo ka kooban ka caawinta neefsashada, dawo lid ku ah daroogada iyo la socosho. Keliya waxannu wax ka beddelnay qaabka loo qaadanayo dawada lidka ah iyo muddada u fiirsiga ah oo ka bilaabmaysa dawada lidka ah ee u horeysa ilaa iyo marka la siinayo dawo lid ah oo kale. Daraasadda waxa ka mid ah 10 daqiiqo oo ah u fiirsasasho joogto ah. Haddii xaaladda qofku sii xumaato tobanka daqiiqo ee u horeeya, waxa la joojinayaa daraasadda isla markaana shaqaalaha gargaarka ayaa samaynaya hawlo caafimaad oo lagugyu daweynayo bukaanka.

**Macluumaad noocee ah ayaa la diiwaangeliyey?**
Magaca iyo lambarka dhalashada
Wakhtiga iyo goobta daaweynta iyo hawlgalka shaqaalaha gargaarka
Faa'idada daaweynta- qaabka aad u neefsanaysay intaan lagu siin dawada, ogsijiinka ku jiray dhiigaaga iyo wakhtiga ay kugu qaadatay inaad caadi u neefsatid,miyirkaaguna ku soo noqday caadi.
Sida ay xaaladaadu tahay daaweynta kadib
Ma waxa lagu geeyey cisbitaalka degdegga ah, cisbitaalka caadiga ah mise waxa lagaaga tegay meeshii aad ku qaadatay daroogada xad-dhaafka ah
Inaad oggolaatay in aannu macluumaadka kugu saabsan ku isticmaali karno daraasaddan

Waxa kale oo aannu diiwaangelin doonnaa in shaqaalaha gargaarku markale kaa daweeyeen daroogo xad-dhaaf ah, 24-kii saacadood ee ka dambeeyey daaweyntii daraasadda, ama in cillad darteed lagu jiifiyey cisbitaal. Lama diiwaangelin doono xidhiidhka kale ee aad la yeelatay shaqaalaha gargaarka, cisbitaalka ama dhakhtarka joogtada ah.

**Yaa arki kara inaad qaatay daroogo xad-dhaaf ah? Ma ka bixi karaa?**
Macluumaadka ku saabsan adiga iyo daaweynta waa la summad tirayaa waxaana lagu kaydinayaa meel amaan ah. Kooxda daraasadda oo keliya ayaa arki karta. Maclumaadka oo dhan waxa loo ilaalinayaa si la mid ah xogta caafimaadka ee caadiga ah. Waxannu ku weydiisanaynaa inaad noo oggolaatid in aannu macluumaadka kugu saabsan ku isticmaalno daraasaddan cilmiyeed. Adiga ayaa dooran kara in aannu isticmaali karno macluumaadka iyo in kale. Dadka qaar ayaan awoodin inay go'aan ka gaadhaan arrintaas isla marka ay daroogadii xad-dhaafka ahayd ka baxday jidhkooda, laakiin qofkii awooda, waxa shaqaalaha gargaarku weydiin doonnaan inuu u

Amesto Translations AS
Org.nr. NO 956 153 557

oggolyahay. Haddii aad diidid waa la tirtirayaa macluumaadkaaga oo dhan. Inkastoo aad goobtaas ku oggolaatid, hadana mar dambe waa ka laaban kartaa oggolaanshaha. Haddii aanad awoodin inaad oggolaansho bixisid kadib markii ay ku gashay daroogo xad-dhaaf ah, waxa lagugu darayaa daraasadda, markaana waa inaad nala soo xidhiidhid haddii aad rabtid inaad ka baxdid.

**Xaq ayaad u leedahay inaad marka aad rabtid ka baxdid daraasaddan cilmiyeed.**

Markaad ka baxdid waa la tirtirayaa dhammaan macluumaadka kugu saabsan ee ku jira daraasadda.



amesto®
Amesto Translations AS
Org.nr. NO 956 153 557

Waxa aan rabaa inaan ka laabto ka qaybgalka daraasadan

amesto®
Amesto Translations AS
Org.nr. NO 956 153 557